

GOLAHA BULSHADA DUGSIGA
AJANDAHA
Noofambar 27, 2017
5:30-6:30 gd
Laybareeriga Riley

Jooga: Ed Price, Nadia Rockwood, Christi Paulson, Sandra Buendia, Julia Waldroup, Chris Mitchener, Fatha Barch, Irma Quiroz, Isabel Gonzalez, Jose Garcia, Sonia Gonzalez, Ana Evangelista, Jim Martin, Ronald Urbin.

Kulanku wuxuu bilaabmay 5:30gd.

Cid kasta waa la soodhaweeyey.

Ed Price, oo matalaya gaadiidka dugsiyada, ayaa ka hadlay tabashooyinka SCC muujisay gu’gii hore. Ugu horrayn, SCC waxa dhibaato ku hayey laydh bixin la’aanta laydhadka dugsiga ee 1300 South iyo 800 West. Horay, SCC waxa loo sheegay in laydhadka la fujiiyey markii ilayska joogsiga la rakibay. Mr. Price wuxuu ku wargeliyey SCC in Scott Van Hoerner uu ku hawlan yahay dib-u-qiimaynta baahida laydhadka dugsiga oo uu la xidhiidhi doono waaxda gaadiidka iyo Riley SCC marka uu qiimaynta dhammaystiro. Dr. Buendia oo ka socda xafiiska dugsiyada ayaa sheegtay in East High, SCC waxay u banbaxeen inay woxogaa isbeddello ah ku sameeyaan socodka gaadiidka. Dr. Buendia waxay soo jeedisay inaanu la xidhiidhno Guddoomiyaha SCC oo jooga East, Rachel Kitterer, si aanu uga helno macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan sida ay u maareeyeen hannaanka. Sidoo kale waxa la go’aamiyey in SCC insay bilaabi doonto xogururinta waalidiinta lagu waydiinayo haddii ay u qaadaan carruurtooda dugsiga ama haddii carruurta lugayso/baaskiil kaxaysato. Su’aashan waxa raaci doona waydiin kusaabsan sababaha waalidiintu laga yaabo inay u doortaan inay u qaadaan carruurtooda dugsiga halkii ay carruurta u lugayn lahaayeen (ma xagga badbaadada ayey la xidhiidhaa?). Mr. Urbin wuxuu ka diyaarin qoraal xogururintan aadista guriga wuxuuna ku lifaaqi khariidadda dhabbaha lugaynta ee badbaadada ah ee guriga aadaysa.

Dr. Buendia waa Agaasimaha Focus Schools ee xafiiska dugsiyada. Waxay wadaagtay qorshaha dugsiyada ee taageetista dugsiyada dhibaataysan. Riley waxay heshay buundo C ah sidaa darteed waxay wali ka helaan taageero xafiiska dugsiyada, si loo hubiyo in buundadoodu ayna ka hoos marin C. Dr. Buendia waxay ka jawaabtay su’aalo waalidku waydiiyey oo kusaabsan qaabdhismeedka taageerada.

Maamule Martin wuxuu sharxay inaanu leenahay jalaska albaabka kaasi oo la sameeyey sanad kahor. Jalaska albaabka runtii lama isticmaalo maadaama inta badan mid kamid ah albaabadu iska furan yahay. Waxaanu bilawnay inaanu isticmaalno toddobaadkan si aanu u hubino sidii hore si dhaanta badbaadada dugsigayaga iyo carruurta. Dadka

waa inay garaacaan jalaska oo ay sugaan inta laga oggolaanayo inay soo galaan. Haddii xafiisku aanu hubin aqoonsiga qofka, wuxuu waydiin macluumaad gaar ah kahor intaan loo oggolaan inuu soo galo. SCC waxay dareensanayd tani inay ahayd tallaabo macquul ah si loo ilaaliyo badbaadada ardadya Riley. Warqad ayaa guriga loo diri Noofambar 29^{da} taasi oo kusaabsan isbeddelkan.

SCC waxay sii wadday inay ka hadlaan qaadhaan-ururiyayaasha. Hal su'aal oo la soo hadal qaaday waxay ahayd, qaadhaan-ururiyayaasha jira sida iibabka jokolaatada iyo cuwaafaha, kuwa uu dugsigu ka helo xaddiga ugu badan. Waxaanu fiirin doonaa su'aashan. Muddadaaas, waxa la ga'aamiyey inaanu daawan doono filim habeenimo Janaayo 25^{da}, 5:30 gd. Maria Mendoza waxay isku dubbaridi tan. Qaandhaan-ururiyaha waxa loogu talogali doonaa abaalmarinaha iyo safarrada aqoon-korodhsi ee ardayda. Waxaanu sidoo kale samayn doonaa buug cunto diyaarin ee cunto diyaarinta qoyska oo ay jeclaan doonaan. Ms. Waldroup waxay ku diyaarin doontaa kaadh cunto diyaarin luuqado badan kuwaasi oo loo diri doono guryaha kahor fasaxa jiilaalka iyo mar labaad Janaayo. Cunto diyaarintu, oo leh sawirro haddii ay suurogal tahay, ayaa loo baahan doonaa in la soo xereeyo dhammaadka Janaayo. Ms. Waldroup ayaa markaa daabici doonto si buug loogu soosaari karo.

Warbixinta PTO waa la taxay ilaa macluumaad badan la bixin karo iyadoo la marayo Ms. Mendoza.

Maamule Martin wuxuu wadaagay dhawr islaaydh oo sheegaya qorshayaasha gurmada wuxuu siiyey xubnaha SCC nuqullada faahfaahsan ee qorshayaasha. Waalidiintu waxay awood u lahaayeen inay su'aalo waydiiyaan kana hadlaan badbaadada Riley. Hal waalid ayaa waydiiyey haddii ay jiraan dariiqyo xaaladda gurmada ah si looga baxo dhismaha, albaabka fasal kasta. Maamulka ayaa isha ku hayn doona tan. Waxa sidoo kale jiray tabasho laga muujiyey wakhtiga dabka iyo qalabka kale ee gurmada ah—miyey ardaydu ay tahay inay dabbaqaan muddada wakhtiga firaaqada ah sida wakhtiga nasashada ama qadada? Maamulka ayaa ka shaqayn doona diyaarinta qaar kamid ah qalabka si ay ardaydu ugu tabobartaan muddada wakhtiyada ay firaaqo jirto. SCC sidoo kale waxay codsatay in kaaliyayaashayada iyo caawiyayaashayadu ay noqdaan qaar si fiican ugu tabobaran taageerista qorshaha gurmada. Mr. Urbin wuxuu la socon doonaa tan.

Kulanku wuxuu dhammaaday 6:30 gd. Kulanka SCC ee xiga wuxuu noqon doonaa mid cunto-wadaag wuxuuna dhici doonaa Diisambar 18^{da}, 5:30 gd.

Jim Martin ayaa diyaariyey ajandaha.